

# Ilaalinta Ammaanka: Manhajka Ilaalinta Ubadka

Keeping Safe: Child Protection Curriculum

Somali / Soomaali

## Macluumaadka waalidka / daryeelaha

Ilaalinta Ammaanka: Manhajka Ilaalinta Ubadka (KS:CPC) waa manhajka ammaanka ubadka midka ugu sarreeya adduunka kuna saleysan caddeyn kaas oo bara carruurta iyo dadka dhallinta yar iney gartaan silic dilka, una sheegaan qaangaar ay aamini karaan, ayna kala gartaan taabashada habboon iyo midda aan habbooneyn iyo siyaabaha ay u ilaalin lahaayeen ammaanka naftooda. Ilaalinta Ammaanka: Manhajka Ilaalinta Ubadka KS:CPC waxaa ardayda u dhiga barayaal soo dhammeystay tababar wax walba u dhan yihiin.

### Dulucda

Manhajka wuxuu ku saleysan yahay labadan duluc:

- Waxaan xaq u wada leenahay in aan nadad ahaanno
- Waxaa naga caawin kara in aan nabad ahaanno annaga oo la hadalna dad aan aamini karno.

### Aagagga Xoogga La Saarayo

Dulucda waxaa lagu soo bandhigayaa afar aag ee xoogga la saarayo:

1. Xaq loo leeyahay in la nabad ahaado
2. Xiriiryada
3. Garashada iyo warbixin gudbinta silic dilka
4. Xeeladaha ilaalinta

### Aragtiyo

Shaxda hoos ku taalla waa mid tilmaameysa aragtiyo la xiriira heerarka sannad dugsiyeedka. Dhacdooyinka waxaa loo soo bandhigayaa si ku habboon da'da iyo korriinka.

	Sanooyinka Hore: Da'da 3-5	Sanooyinka Hore: Da'da 5-7	Sanooyinka Hoose: Da'da 8-10	Sanooyinka Dhexe: Da'da 11-14	Sanooyinka Sare: Da'da 15-17 iyo ka weyn
<b>Xaq loo leeyahay in la nabad ahaado</b>	Shucuurta Nabadgelyo leh iyo Aan nabadgelyo laheyn Astaamaha digista Gargaarrada deg degga ah	Shucuurta Nabadgelyo leh iyo Aan nabadgelyo laheyn Astaamaha digista Gargaarrada deg degga ah Halis-u-bareerid	Shucuurta Nabadgelyo leh iyo Aan nabadgelyo laheyn Astaamaha digista Gargaarrada deg degga ah Halis-u-bareerid Diyaarin	Nabadgelyo leh iyo Aan nabadgelyo laheyn Astaamaha digista Gargaarrada deg degga ah Halis-u-bareerid Diyaarin Cadaadis maanka wareema iyo xirfad aan daacad aheyn	Nabadgelyo leh iyo Aan nabadgelyo laheyn Astaamaha digista Halis-u-bareerid Diyaarin Cadaadis maanka wareema iyo xirfad aan daacad aheyn Dabeecad wax ku ool ah
<b>Xiriiryada</b>	Baahi iyo rabitaan Heyb iyo xiriiryo Aaminid iyo isku xirnaan	Baahi iyo rabitaan Xaqsimid iyo xaqsimid la'aan Xuquuqda carruurta Heyb iyo xiriiryo Xoogsheegad Awood Aaminid iyo isku xirnaan	Xuquuqda iyo mas' uuliyadaha Laga raalli yahay Xiriiryo caafimaad qaba iyo kuwa aan caafimaad qabin Qalad laga aaminsan yahay lab iyo dheddig Xoogsheegad Sanca lagu xoogsheegto Awood Aaminid iyo isku xirnaan	Xuquuqda iyo mas' uuliyadaha Laga raalli yahay Xiriiryo caafimaad qaba iyo kuwa aan caafimaad qabin Qalad laga aaminsan yahay lab iyo dheddig Xoogsheegad Sanca lagu xoogsheegto Awood Aaminid iyo isku xirnaan	Xuquuqda iyo mas' uuliyadaha laga raalli yahay Xiriiryo caafimaad qaba iyo kuwa aan caafimaad qabin Qalad laga aaminsan yahay lab iyo dheddig Xoogsheegad Sanca lagu xoogsheegto Awood Daandaansi faraxumeyn wata Aaminid iyo isku xirnaan
<b>Garashada iyo warbixin gudbinta silic dilka</b>	Magacyada qaab shiska jirka Mid bulsho iyo mid gaar ah Taabasho nabadgelyo leh iyo mid aan nabadgelyo laheyn Aqoonsiga silic dilka Sir nabadgelyo leh iyo mid aan nabadgelyo laheyn Handaadaadyo	Magacyada qaab dhiska jirk Mid bulsho iyo mid gaar ah Taabasho nabadgelyo leh iyo mid aan nabadgelyo laheyn Aqoonsiga silic dilka Sir nabadgelyo leh iyo mid aan nabadgelyo laheyn Dhagarta iyo aaminaadda	Magacyada qaab dhiska jirka Mid bulsho iyo mid gaar ah Taabasho nabadgelyo leh iyo mid aan nabadgelyo laheyn Silic dil iyo dayac Sir nabadgelyo leh iyo mid aan nabadgelyo laheyn Ammaanka sancada Internetka oo laga shukaansado Gacan ka hadalka qoyska iyo guriga	Magacyada qaab dhiska jirka Mid bulsho iyo mid gaar ah Silic dil iyo dayac Shukaansi gacan ka hadal wata Ammaan sanceed iyo silic dil Farriimo la xiriira cawrada Gacan ka hadalka qoyska iyo guriga Faragelinta kor joogtada	Macluumaadka qofka u gaarka ah Caafimaadka qofka Silic dil iyo dayac Diyaarin Shukaansi gacan ka hadal wata Ammaan sancada iyo silic dil Farriimo la xiriira cawrada Gacan ka hadalka qoyska iyo guriga Faragelinta kor joogtada
<b>Xeeladaha ilaalinta</b>	Xeeladaha xallinta dhibaataada Isla qumanaan Adkeysyi Soo taagnii' Dib u eegidda isku xirnaanta	Xeeladaha xallinta dhibaataada Isla qumanaan Adkeysyi Soo taagnii' Dib u eegidda isku xirnaanta	Xeeladaha xallinta dhibaataada Isla qumman Adkeysyi Soo taagnii' Dib u eegidda isku xirnaanta Isku xirnaanta bulshada	Xeeladaha xallinta dhibaataada Adkeysyi Soo taagnii' Dib u eegidda isku xirnaanta Isku xirnaanta bulshada	Xeeladaha xallinta dhibaataada Adkeysyi Soo taagnii' Dib u eegidda isku xirnaanta Isku xirnaanta bulshada

Wixii macluumaad dheeraad ah kala xiriir dugsi ama xarunta ama booqo barta Internet ka ee KS:CPC: <http://tiny.cc/KSCPC-ParentCarerInfo>